



Federal Republic of Somalia
Federal Parliament
The Upper House

Nuqulka Rasmiga Ah ee Hadal Qoraalka Gaaban ee Golaha Aqalka Sare ee BFS

Si waafaqsan Qod.39aad ee Xeer hoosaadka Golaha Aqalka Sare

Baarlamaanka 11 ^{aad}	
Kalfadhiga: 7aad	Kulanka: 3aad
Taariikhda: 18 October, 2025	Goobta Fadhiga: Xarunta Aqalka Sare
Saacadda uu Furmay: 12:00 PM	Saacadda uu Xirmay: 01: 05 PM
Shir Guddoonka Fadhiga: Guddoomiye ku xigeenka 2aad Golaha Aqalka Sare Senator Cabdullaahi Cali Xirsi (Timaacadde)	Guntanka Kulanka: 28 Senator
Martida Kulanka:	Ajedayaasha Kulanka: 1. Akhrinta Aayadaha Qur'aanka. 2. Ansixinta Ajendaha. 3. Akhrinta 2 ^{aad} ee Hindise-sharciyeedka Kaalmo sharciyeedka Federaalka. 4. Sii wadista ka doodista Warbixin ku saabsan ka talo bixinta kaalinta Aqalka Sare ee Arrimaha Dowladaha Xubinta ka ah Dowlada federalka ah ee Soomaliya.

Furitaanka Kulanka:

Senator Siciid Cabdi Xuseen Cawke ayaa akhriyey Aayadaha Quraanka ee Kulanka lagu furay.

Ansixinta Ajandayaasha Kulanka:

Guddoomiyaha ku xigeenka 2aad Golaha Aqalka Sare Senator Cabdullaahi Cali Xirsi

(Timacadde) ayaa xubnaha kulanka fadhiyey ka codsaday in ay ansixiyaan Ajandayaasha kulanka, codaynta ayaana u dhacday sidaan:

Oggol: 28 Senator

Aamusnaansho: Majirin

Diidmo: Majirin

Nuxurka Kulanka:

Guddoomiye ku xigeenka 2aad Golaha Aqalka Sare Senator Cabdullaahi Cali Xirsi (Timacadde).

Ayaa u yeeray Guddoomiyaha Guddiga Garsoorka, Cadaalada, Diinta iyo Awqaafta Xuquuqul Insaanka, Haweenka iyo Caruurta Senator Naciima Xasan Xaaji Maxamuud (Gadhwayne), si ay Golaha uga hor akhriso warbixinta akhrinta 2aad ee Hindise Sharciyeedka Kaalmo sharciyeedka Federaalka. Warbixinta kaddib, 10 Senator ayaa ka dooday akhrinta labaad ee Hindise Sharciyeedka. Warbixinta iyo dooda senatarada kaddib, Guddoomiyaha ayaa sheegay in uu baaqaday ajandihii afaraad ee kulanka.

Go'aamada kulanka:

1. Ansixinta Ajandayaasha kulank.
2. Guddoomiyaha Aqalka Sare ayaa faray Guddiga Garsoorka inay soo diyaariyaan qodobada laga dooday, iyaga oo la kaashanaya sharciyaqaanada Golaha Aqalka Sare, si loo marsiiyo akhrinta saddexaad.
3. Guddoomiye ku xigeenka 2aad Aqalka Sare ayaa faray Xoghayaha Guud in Ajandaha 4aad lagu soo daro kulanka xiga si ay uga aragti dhiibtaan senatarada.

Ugu dambayntii, Guddoomiyaha ku xigeenka 2aad Golaha Aqalka Sare Senator Cabdullaahi Cali Xirsi (Timacadde) ayaa kulanka soo xiray saacadu markay ahayd **01:05 PM**.

DHAMAAD